

Waa maxay faraxumayntu?

Faraxumayntu waa dabeecad kasta oo ficil kaas oo qofka dareensiiya raaxa-daro, cabsi, handadaad ama cabsi gelin. Waa dabeecad galmood oo qof aanu ku raacin, halka qofka kale isticmaalo awood jireed ama shucuureed. Waxaana ka mid noqon kara ku dhibaataynta galmoodka, faraxumaynta iyo kufsasho halis ah. Faraxumayntu waa ku tagri-fal awoodeed. Faraxumayntu marna ma noqoto masuuliyada dhibanaha/badbaadaha.*

Faraxumayntu waa ficil rabshadeed noocya badan oo faraxumaynta ahina waa gaf dambiyeed

Ka aamusida faraxumaynta ee bulshada waxay la macna tahay in dhibanaha/badbaadayaasha loo diiday fursada ay kaga hadlaan khibradooda. Dhibane/badbaadayaal badan ayaa waxaa soo wajaha amakaaga, eedaynta iyo kaalmo la'aanta kuwa ku wareegsan.

CASA House waxay aqoonsan tahay in:

- Faraxumayntu tahay xadgudub xuquuqda aadanaha ayna tahay mid ka soo horjeeda shakhsiga iyo bulshada. Sidaas darteed, dhamaan bulshada iyo dhamaan qaybaha dawladu waa inay qaadaan masuuliyada sidii looga hortegi lahaa loona cirib tiri lahaa.
- Faraxumaynta waxaa keena isu dheelitir la'aanta u dhexaysa ragga iyo dumarka. Waa fal rabshad wata, badanaana waxaa sameeya ragga, kuwaas oo awoodooda meel mariya.
- Faraxumayntu waxay leedahay natiijo shucuureed, bulsho, caafimaad, siyaasadeed iyo sharci oo shakhsiyaadka iyo bulshoweynta.
- Ka hortegida iyo ciribtirida faraxumayntu waa masuuliyada dhamaan bulshada.

Wixii ku saabsan CASA House

CASA House waa qayb ka tirsan Isbitaalka the Royal Women's Hospital waxaana kharajkiisa bixisa dawlada waxaana adeega la bixiyaa 24ka saacadood. CASA House waxaa ka go'an xaqiijinta in aamuska la xiriira faraxumaynta la joojiyo iyo in dhibanaha/badbaadayaasha la siiyo kaalmada lagama maarmaanka ah.

CASA House waxaa loo asaasay ixtiraamida xuquuqda dhibanaha iyo badbaadayaasha:

- in la dhegaysto
- in la rumeeyo
- in loola dhaqmo si sharaf leh
- in lagula hadlo afkooda, iyadoo mutarjum ka tarjumayo haddii loo baahdo
- in loola dhaqmo si xasaasi ah lana fahmi karo
- in la siiyo macluumaadka khuseeya oo ay xalk ku helli karaan
- inay go'aankooda samaysan karaan
- in la ilaaliyo sirtooda iyo barayfasigooda

Adeegyada CASA House waxaa lagu hellaa lacag la'aan waana qarsoodi waxana la siiyaa:

- dumarka waaweyn iyo ragga kuwaas oo ah dhibanaha/badbaadayaasha faraxumaynta
- xubnaha qoyska oo aan gafka geysan, ka qaybgalayaasha kaalmaynaya dhibanaha/badbaadayaasha
- shakhsiyaadka mihnadlayaasha ah iyo kooxaha
- caafimaad, kaalmo bulsho iyo hay'ado kaalmo.

Adeega waxaa helli kara kuwa ku nool, ka shaqeeya ama wax ka barta degmooyinka Moreland, Hume, Melbourne, Yarra iyo Moonee Valley iyo bukaanka isbitaalka the Royal Women's Hospital.

**CASA House waxay u isticmaashaa erayada dhibane/badbaade markay ka hadlayaan dumarka iyo ragga ay la shaqeeyaan si ay u muujiyaan inay yihiin dhibanayaal dembi iyo weliba inay leeyihiin awood weyn oo ay ku badbaadaan.*

Adeega CASA bixiso

Daryeelka qalaalasaha degdegta ah

Adeega qalalaasaha 24ka saacadood ee talasiinta, kaalmada, macluumaadka iyo u hadlida, kaas oo ay ku jiraan arrimaha la xiriira caafimaadka iyo sharciga. Kaalmada joogtada ah oo la siiyo dhibanaha/badbaadayaasha.

Talasiinta, kaalmada iyo u hadlida

Adeegayaga gaaban iyo midka mudada dheera waxaa ka mid ah kaalmada, macluumaadka iyo u hadlida taas oo looga gol leeyahay siinta caawimada ka soo ladnaanta, cadaynta xuquuqda iyo carab-baabida waxaa la helli karo.

Kooxaha Kaalmada

CASA House waxay fursad siisaa dhibanaha/badbaadayaasha si looga bixiyo kaalmo la wadaagayo kooxda dhexdeeda.

Kaalmada qoysaska iyo asxaabta

Macluumaad, kaalmo iyo xawilad ayaa la siiyaa asxaabta aan gafka geysan, xubnaha qoyska iyo dhibanaha/badbaadayaasha.

La tashiga mihnadlayaasha

CASA House waxay awoodaa inay siiso macluumaad, ka dhegaysi, iyo la tashi mihnadlayaasha kale.

Waxbarashada iyo tababarka

CASA House waxay bixisaa hawlo waxbarasho iyo tababar. Kulan aragti la isku dhaafsanayo ayaa waxaa helli kara kooxaha bulshada, hay'adaha iyo bulshaweynta guud.

Cilmi baarista iyo Nadaamka dadweynaha

CASA House waxay kaloo qabataa cilmi baaris, mashruucya khaasa, wax ka dhihida warbaahinta waxayna talo siiyaan kuwa sameeya nadaamka dadweynaha.

Faraxumaynta – Xaqiiqada

Xaqiiqadu waa:

- dhibaha/badbaadaha maaha in eed la saaro
- faraxumayntu waa ihaanayn, waana la kulmid rabshad
- dhibanayaasha/badbaadayaasha badankood waa yaqaaniin gaf sameeyaha
- gafsameeyayaashu waxay ka iman karaan dhaqamo, iyo dhaqan dhaqaale kala duwan
- faraxumayntu caam bay ku tahay kuwa isqaba

3dii dumar ah 1 ka
mid ah 6dii rag ah 1
ka mid ah Ayaa ah
kuwa ka soo badbaadey
faraxumayn ilmanimo

Ferguson, D M & Mullen, P E (1999)

'The prevalence of sexual abuse during childhood',
in P E Mullen (Ed), *Childhood sexual abuse: An evidence
based perspective*, London: SAGE Publications

Sida loola xiriiro CASA House

Laymanka telefoonka ee kaalmada iyo Talasiinta

Telefoon **(03) 9635 3610**
1800 806 292 (wiciid lacag la'aana)

Casa House waxay ku taallaa:

Queen Victoria Women's Centre
3rd Floor
210 Lonsdale Street
Melbourne, Victoria 3000

Maamulka

Telefoon **(03) 9635 3600**
Fakis (03) 9663 9742
TTY (03) 9635 3620

casa@rwh.org.au
www.rwh.org.au/casa/

Khadka Qalalaasaha iyo Faraxumaynta (saacadaha shaqada ka dib)

Telefoon **1800 806 292** (lacag la'aan)
TTY (03) 9344 2744

Breaking the silence (Somali)

Jebinta Aamuska

(03) 9635 3610
ama **1800 806 292** (wiciid lacag la'aana)



CASA house
Centre Against Sexual Assault



the women's
the royal women's hospital